

Mashruuca horumarinta nabadgelyada Park iyo Porland

Wajiga 1 soo koobista ka qeyb gelinta – Agoosto-November 2024

Degmada Hennepin waxa ay qorsheyneysaa horumarinta nabadgelyada wadooyinka Park iyo Portland inta u dhaxaysa I94 iyo Wadada 46aad Galbeed (county Road 46). Ka qeyb gelinta dadweynaha ee horumarinta Amaanka Wadooyinka Park iyo Portland oo si wanaagsan loo wargeliyo , talo geliyo, qeyb geliyo, oo uga talo bixiyaan deganayaasha iyo ka qeyb galayaasha inta ka qeyb qaadanaysa fikradda naqshadeynta ee la doorto.Wajiga 1 ee ka qeyb gelinta waa mid xoogga saareysa ururinta ra'yiga iyo dariiqa dadku doonayaan in mashruuca loo fuliyo.

Inta aan la gaarin wajiga shaqaalaha mashruuca ayaa la xiriiraya xubnhaha bulshada iyaga oo xoogga saraaya qeybinta sahanka ee xaaladda iminka jirta ilaa hogaamiyayaasha bulshada iyada oo loo marayo ka qeyb gelinta hogaanka iyo kulamada isku dhafka ah. Talo soo jeedinta la soo bandhigay kulamada wadajirka ah aad baa loo tixgeliyey iyada oo shaqaalaha mashruuca ay u gudbayaan wajiga 1 ee ka qeyb gelinta.



Sidee ayaa dadka lagu gaarsiin karaa

Wajiga 1 ee ka qeyb gelinta waa mid xoogga saaraya ururinta ra'yiga iyad oo la raacayo hababka soo socda:

Kulamada dadweynaha u furan ee Mas'uuliyiinta

Shaqaalaha mashruuca ayaa fududeeyey in Angela Conley qabato kulan looga jawaabo su'aalaha dadweynaha ee Sabathani Community Center Oktoobar 24 saacadda 5 ilaa 7 fiidnimo. Waxaa ka qeyb galay dad ka badan 50 qof waxaana ay shaqaaluhu soo urureen 39 ee kaararka ra'yi dhiibashada.

Shaqaalaha xafiiska mas'uulka ayaa maamulay oo ka qeyb qaatay kulankan.

Kulanka Dadweynaha U Furan

19Kii Nofeembar 5 ilaa 7 fiidnim oo lagu qabtay American Swedish Institute, kulan dadweynaha u furan si dadweynaha loola socodsiiyo mashruuca laguna ogaado ra'yiga dadweynaha ka qeyb qaatay ee xalladda wadooyinkaas iyo degaanka.

Hababka Igu gaarsiyey waxaa ka mid ah kaarar boostada loogu diray, bogga internetka iyo iimeyl. 24 qof ayaa ka soo qeyb galay shaqaalaha mashruucana waxaa soo gaaray ra'yiga shan qof iyo lix qof oo faalo qoraal ah ka bixiyey mashruuca.

Kulamada goobaha kala duwan

Shaqaalaha mashruuca waxa ay marti geliyeen lix kulan oo goobo kala duwan lagu qabtay sanadkii 2024 ee goobaha mashruuca si bulshada loogu soo bandhigo waxaana ka qeyb qaatay 177 qof. Goobaha lagu qabtay waxaa ka mid ahaa:

**Greenway
Glow Event**
Siteembar 7

**Peavey Park
Field**
Oktoobar 1

**Sabathani Community
Center Fall Health Fair**
Oktoobar 5

**American Swedish
Institute Makers Night**
Oktoobar 10

**Midtown Global Market
Community Resource event**
Oktoobar 11

**Seward
Friendship Co-Op**
Oktoobar 23



Sidee ayaan ku soo ururinay ra'yiga dadweynaha

Ka qeyb galayaasha waxaa la siiyey fursad ay ra'yigooda kaga dhiiban karaan mashruuca iyo naqshadda horudhaca ah hababka soo socda:

 **Kaararka ra'yi dhiibashada**

 **Faalo laga bixiyo khariiddada goobta mashruuca**

 **Ra'yi dhiibasho afka ah oo shaqaalaha mashruuca lala wadaago**



Waxyaabaha aad nala wadaagteen

Boqolaal ra'yi ayaa laga dhiibtay xaaladda iminka taagan iyada kaararka ra'yi dhiibashada la soo diray wajigan. Shanta qodob ee ugu waaweyn ee laga hadlay waa:



Amaanka wadooyinka iyo yareynta xawaaraha

Qaar ka mid ah ka qeyb galayaasha ayaa cabiray dareenkooda ku jeeda xawaaraha gaadiidka ee wadooyinka Park iyo Portland. Talo soo jedin ku aadan xawaaraha gaadiidka waxaa ka mid ah wadooyinka oo ciriir laga dhigo, wareeg lagu daro, iyo fulinta sharciga.



Tixgelinta Bulshada iyo Lahaashaha

Ka qeyb galayaashu waxa ay xoogga saareen xaaladda iminka taagan iyo isticmaalka wadada. Waxaa jira codsiyo lagu codsanayo in laga qeyb geliyo bulshada aan horay uga qeyb qaadan, oo ay ka mid yihiin bulshada ku hadasha afka Isbaanishka iyo Soomaaliga, si mashruuca u noqdo mid u taagan baahida mudada dheer ee xaafadaha halkii gaadiidka oo kaliya loo fududeyn lahaa.



Kaabayaasha dhaqaalaha ee Bushkuleetiyaada iyo dadka lugeynaya

Waxa kale oo ka qeyb galayaashu codsadeen horumarinta amaanka dadka lugeynaya, sida nalalka oo lagu kordhiyo, nalal iska daba dhacaya, iyo goob laga talaabo wadooyinka. Waxaa aad loo tageeray horumarinta nabadgelyada khadka bushkuleetiyaada, sida nalalka oo lagu kordhiyo, nalal iska daba dhaca, iyo goob laga talaabo.



Kobcinta dhulka Green iyo streetscape

Qaar badan oo ka qeyb gaayaasha ahl ayaa soo jeediyey in lagu daro dhul cagaaran , wadooyinka la horumariyo, iyo beero roobka ku baxa iyo jardiinooyin si ay u qurxiyaan wadooyinka. Hase yeeshee ,dadka qaar waxa ay dareenn ka qabeen culeyska dayactirka, arrimaha la xiriira is aragga, iyo waxyaabo kale oo aan lagu talo gelin, sida "caws dilaha ku dhasha" ama waxyaabo culeys ku noqda dadka lugta ah. Waxakaloo oo jirtay talo soo jeeddin ku saabsan fududeynta bushkuleetiyaada, calaamadaha iyokhad amaan ah ee bushkuleetiyaada oo dhagax kala qeybiyo.

La soo xiriir shaqaalaha mashruuca



Olagoke Afolabi | Maamulaha Mashruuca, Degmada Hennepin



olagoke.afolabi@hennepin.us



Hennepin.us/park-portland

